
# ILAAH KELIYA

# IYO

# JID KELIYA



ILAAH KELIYA IYO JID KELIYA

# ILAAH KELIYA IYO JID KELIYA

KEVIN G. DYER

Emmaus Correspondence School

© Info/Contact
Postbus 54234
3008 JE  Rotterdam - NL
www.info-contact.nl

*Ilaah keliya iyo jid keliya* waxaa laga turjumey *One God, one way* oo uu qoray Kevin G. Dyer (1959, 1973), oo asal ahaan uu daabacay
Emmaus Correspondence School,
2570 Asbury Rd, Dubuque,
IA 52001-3099, USA.

*Ilaah kehya iyo jid keliya* waxaa la daabacay Noofembar 1993:

English Press
Box 30127
Nairobi, KENYA

Sida loo barto

1. Dersiga hal mar dhaqsi u akhri. Haddana mar labaad akhri oo aad u hubso inaad wada garatay meeris kasta.

2. Markii aad u malaysid inaad dersiga garatay, tijaabada su'aaleheeda ka jawaab.

3. Haddii aad wax su'aal ah qabtid, ku soo qor baalasha tijaabada.

4. Fadlan waxaannu kaa codsanaynaa inaadan dib noogu soo dirin buugga oo dhan; laakiin aad soo dirtid baalasha tijaabada kuwaasoo leh midab ka duwan buugga intiisa kale. Waxaannu kaloo kaa codsanaynaa inaad wixii su'aalo ah ee aad qabto ku soo qortid isla baalasha tijaabada.

5. Markii aad su'aalaha ka wada jawaabto, soo qor magacaaga iya meesha lagaa heloba, oo warqadahana ku soo hagaaji cinwaanka hoos ku qoran:

6. Haddii natiijada dhibcaba and hesho gaaraan 60% in ka badan, waxaad helaysaa shahaado.

7. Haddii aad buuggan jeclaysatay u sheeg saaxiibadaada iyo qaraabadaada, si ay iyaguna u bartaan.

**Codka Nolosha Cusuh**
P.O. Box 50770
Nairobi, KENYA

Barta wax ku saabsan Ilaah iyo jidkiisa.
Waxaanad ku baratataan 12 kan dersi oo laga soo qaaday kitaabkiisa:

1. Ilaah keliya
2. Xaawa iyo Aadan
3. Qaabiil iyo Haabiil
4. Nebi Nuux
5. Nebi Ibraahim
6. Nebi Muuse
7. Nebi Daa'uud
8. Sayid Ciise Masiix
9. Dembi
10. Ducada iyo camalka san
11. Waxyaalaha dhici doona
12. Jid keliya

*"... Rabbiga Ilaaheenna ahu waa Rabbi keliya."*
***Kitaabkil shanaad ee nebi Muuse oo la yiraahdo Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4***

*"Mid kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay,*
*ma jiro magac kale samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyey*
*oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno."*
***Falimaha Rasuullada 4:12***

## Dersiga Kowaad

## ILAAH KELIYA

Waxaa jira Ilaah keliya oo weyn oo qaadir ah oo wax waliba abuuray. Waxaa jiri kara Ilaah keliya. Ilaahyada kale oo dhan waa wada been iyo bilaash.

Qof alla qofkii yiraahda, Ilaah ma jiro, waa nacas ah oo haddana kufri ah. Banii-aadmigu wuxuu u baahan yahay inuu eego oo fiiriyo adduunka uu ku kar nool yahay oo qura, si uu ku aqoonsado in Ilaah jiro. Jiritaanka adduunka qudhiisu wuxuu u caddaynayaa Abuure. Dhirta badan oo kala noocnooc ah iyo xayawaanka nool oo si kaamil ah loo wada abuuray, waxay dhammaantood caddaynayaan in Ilaaha weynu uu jiro oo iyaga abuuray. Qorraxda iyo dayaxa iyo xiddigaha oo dhammu waxay wada caddaynayaan in mid kale ay abuuratay. Midkaas kalena waa Ilaah. *"Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray."* (Kitaabkii kowaad ee Muuse oo la yiraahdo Bilowgii 1:1)

*Maalintii kowaad* ee uumista ayan Ilaah wuxuu yiri, *"Iftiin ha ahaado."* Markiiba dhalaalkii ugu horreeyey ee iftiinka ayan gudcurkii iftiimiyey. *"Ilaahna wuxuu arkay iftiinkii inuu wanaagsan yahay: Ilaahna iftiinkii ayuu ka soocay gudcurkii. Ilaahna iftiinkii wuxuu u bixiyey Maalin, gudcurkiina wuxuu u bixiyey Habeen." (Bilowgii 1:4-5)*

*Maalintii labaadna* Ilaah wuxuu kala qaybiyey biyihii, oo wuxuu ka dhigay in samooyinka muuqdaan.

Maalintii saddexaadna *"Ilaahna wuxuu yiri, Biyaha samada ka hooseeya meel ha isugu soo urureen, oo ciidda engegani ha muuqato; sidaasayna ahaatay. Markaasuu Ilaah ciidii engegnayd u bixiyey DhuI; ururkii biyahana wuruu u bixiyey Bado: Ilaah wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay."* (Bilowgii 1:9-10) Isla maalintaas qudheeda ayaa Ilaah wuxuu ka dhigay in dhulku soo bixiyo doog iyo dbir. Ilaah wuxuu ku farxay uumiddii uu wax uumay.

*Maalintii afraadna* Ilaah wuxuu abuuray qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha. Iftiinka weynu (qorraxdu) maalinnimaduu u taliyaa, iftiinka yaruna (dayaxa) habeennimaduu u taliyaa. Xiddigaha aan tirada lahayn oo dhanna waxaa wada abuuray Ilaaha jira oo runta ah.

*Maalintii shanaadna* Ilaah wuxuu uumay kalluunka badda ku dhex dabaasha iyo wax kasta oo ku duula cirka iyo dhulka inta u dhexaysa. Neberiyada iyo bahallada badda iyo kaluunka waaweyn iyo kalluunka yaryar iyo gorgorada iyo shimbirrada hawada duula oo dhanba, waxaa wada uumay Ilaaha weyn.

*Maalinta lixaad* Ilaah wuxuu uumay xayawaanka iyo waxyaalaha dhulka ku gurguurta oo dhan. Dugaagga, xoolaha, libaaxyada, maroodiyada, iyo cayayaanka oo dhan waxaa wada uumay Ilaaha jira ee runta ah. Markii uumista ugu dambaysay ayaa Ilaah wuxuu yiri, *"Aan nin inoo eg ka samayno araggeenna."* (Bilowgii 1:26) Ilaah dhoobo ayuu dhulka ku qaaday oo wuxuu ku sameeyey nin. Haddana sanka labadilsa dul ayuu kaga neefsaday, markaasaa ninkii naf nool noqday.

Ilaaha runta ah oo keliya ayaa uumi kara duni saas u weyn oo qurux badan oo u wacan sida middan aan joogno oo kale. Ilaaha runta ahu sidee buu yahay?

Siyaabaha wanaagsan oo Ilaah lagu ogaan karo middood, ayaa waxay tahay in la barto dabeecooyinkiisa isaga u goonida ah. Kuwaasna waxaa ka mid ah:

1. **Ilaah wuxuu joogaa meel kasta isku mar qura.** Ilaah ciduna kama dhuuman karto. Goor kasta wax walba wuu u jeedaa. Ilaah waddan kastaba wuu joogan isku mar. Nebi Daa'uud wuxuu yiri, "Xaggee baanse wejiga uga cararaa? ... haddaan dego badda darafyadeeda ugu shisheeyaba, Xataa halkaas gacantaada ayaa i hoggaamin doonta ... Xataa gudcurku igarna kaa qariyo..." (Sabuurka 139:7,9,12)

2. **Ilaah wax kasta waa yaqaan oo waa og yahay.** Isagu wuu og yahay feker kasta iyo wax kasta oo ku qarsoon qalbigeenna. Nebi Daa'uud wuxuu yiri, *"Rabbiyow, waad i baadhay, oo waad i soo ogaatay. Waad og tahay fadhiisashadayda iyo sarakiciddaydaba, Oo fikirkaygana rneel fog baad ka garataa. Waayo Rabbiyow, eray aanad aqoonu carrabkayga kuma jiro, Laakiinse adigu waad wada og tahay."* (Sabuurka 139:1-2,4) Waxaa suurowda inaan dadka wax ka qarin karno, laakiinse Ilaah innaba wax aan ka qarin karno ma jiro.

3. **Ilaah wax kasta wuu ilaaliyaa.** Ilaah caalamka isagaa uumay. Isagaana haatan xannanneeya oo wada. Isagaa wada ilaaliya dhulka dhaqdhaqaaqiisa, oo Isagaa ilaaliya qorraxda iftiinkeeda iyo roobkaba.

4. **Ilaah waa daa'in.** Isagu bilowna ma lahayn, weligiisna dhammaad yeelan maayo. Ilaah weligiis wuu jiray, weligiisna wuu jiri doonaa. *"Intaan buuruhu dhalan ka hor, Iyo intaanad samayn dhulka iyo dunida, Iyo xataa weligeed iyo weligeedba adigu waxaad tahay Ilaah."* (Sabuurka 90:2)

5. **Ilaah waa xaqaani.** Wax alia wixii uu sameeyan wuu ku qumman yahay oo daacad buu ku yahay. *"Rabbiyow Ilaaha Qaadirka ahow, shuqulladaadu way weyn yihiin ao, yaab bay leeyihiin. Boqorka quruumahow, jidadkaagu waa xaq oo waa run".* (Muujintii Ciise Masiix oo Yooxanan loo muujiyey 15:3)

6. **Ilaah waa qoduus.** *"Qoduus, qoduus, qoduus waxaa ah Rabbiga ah Ilaaha Qaadirka ah, oo jiray oo jira oo irnan doona."* (Muujintii 4:8) Ilaah weligiisna qoduus buu yahay, weligiisna qoduus dhab ah buu ahaan doonaa. Taasu waa wax Ilaah lagu yaqaan oo gaar u ah. Ilaah waa qoduus, oo sidaas daraaddeed waa inuu dembiga ciqaabo. Waxyaabaha sharka ah oo aan samaynana waa dembi. Ilaah wuu neceb yahay waxyaabaha sharka ah oo aynu samayno. Isagu dembiga wuu neceb yahay, wanaaggana wuu jecel yahay.

7. **Ilaah waa naxariis badan yahay.** Nebi Daa'uud wuxuu yiri, *"Rabbigu jidadkiisa oo dhan wuu ku qurnman yahay, Oo shuqulladiisa oo dhanna wuu ku nimco badan yahay. Rabbigu waa u dhow yahay inta isaga barida oo dhan. Kuwaas oo ah inta runta ku barida oo dhan."* (Sabuurka 145:17-18)

Inkastoo Ilaah neceb yahay waxyaalaha xunxun iyo dembiyada aynu samayno, haddana isagu wuxuu inoo hayaa raxmad iyo naxariis. Wuuna ina jecel yahay innaga, laakiinse dembigeenna ma uu jecla. Wuxuu innaga doonayan inaynu ahaanno aammin iyo xaqaani. Ilaah wuxuu rag iyo dumar iyo carruurba ku doonayan inay isaga jeclaadann. Adigu Ilaah miyaad jeceshahay? Isagu waa ku jecel yahay, laakiinse dembigaaga ma jecla.

## Tijaabada Kowaad

### Ilaah keliya

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Ilaah wuxuu joogan
   B) Meel keliya isla mar.
   T) Laba meelood oo keliya isku mar.
   J) Meel kasta isla mar. -----------
2. Maalintii afraad ee uumista Ilaah wuxuu abuuray
   B) Qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha.
   T) Kalluunka, shimbirraha iyo baadda.
   J) Nin. -----------
3. Ilaah wuxuu raban
   B) In isaga ragga keliyuhu jeclaado.
   T) In isaga dumarka keliyuhu jeclaado.
   J) In isaga ragga iyo dumarka, iyo carruurtuba ay wada jeclandaan. -----------
4. Maalintii ugu dambaysay uumista, Ilaah
   B) Wuxuu kala soocay birriga iyo badaha.
   T) Wuxuu uumay nin.
   J) Wuxuu yiri, "Iftiin ha ahaado". -----------
5. Ilaah wuxuu jecel yahay
   B) Dembigeenna.
   T) Innaga iyo dembigeennaba.
   J) Innaga. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Ilaah waa qoduus, taas aawadeed muxuu ciqaabi doonan?

   ______________________________

7. Bilowgii Ilaah muxuu abuuray?

   ______________________________

8. Bal yaa weligiis jiray, weligiisna jiri doona?

   ______________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Waxaa jira Ilaah keliya oo run ah. -----------

10. Ilaah wax kasta wuu og yahay. -----------

## Dersiga Labaad

## XAAWA IYO AADAN

Ninkii iyo naagtii ugu horreeyey dadh dunidan ku noolaada ma ay ahayn wax Ia dhalay. Xaawa iyo Aadan mooyaane, banii-aadmiga kale oo dhammu dunidan way ku dhasheen iyagoo ilmo yar ah. Xaawa iyo Aadan way ku duwanaayeen dadka kale. Iyagu ma ay dbalan, ee Ilaah baa si toos ah abuuray.

Maalintu lixaad ee uumista, ayaa Ilaah wuxuu dhulka ku qaaday dhoobo oo wuxuu ku sameeyey nin. Ninkii sankiisii ayuu ku afuufay neeftii nolasba markaasaa ninkii wuxuu noqday qofkii banii-aadmiga ugu horreeyey ee ifka yimaada. Ilaah ninkaas wuxuu u bixiyey Aadan. Aadan Ilaah baa si toos ah u abuuray.

Ilaah wuxuu garwaaqsaday inaynan ninka ku wanaagsanayn inuu keligii ahaado, sidaas daraaddeed wuxuu Aadan u sameeyey mid isaga gargaarta. Ilaah wuxuu Aadan ku soo dejiyey hurdo weyn. Oo intii Aadan hurday, ayaa llaah Aadan feerahiisa dillaacshay oo wuxuu ka soo bixiyey feer. Markaasuu hilibkii awday, feertiina Ilaah naag buu ka uumay. Naagtiina Aadan wuxuu ku magacaabay Xaawa.

Ilaah wuxuu abuuray beer wanaagsan oo ninkii iyo naagtiiba halkaasuu dhigay. Wuxuu iyagii ku yiri, *"Wax badan dhala oo tarma, oo dhulka ka buuxsama, oo ka sara mara dhulka, oo xukuma kalluunka badda, iyo haadda hawada, iyo wax hasta oo nool  oo dhulka kor dhaqdhaqaaqa."* (Kitaabkii kowand ee Muuse oo la yiraahdo Bilowgii 1:28) Ilaah wuxuu u keenay dhammann xayawaanka oo dhan iyo shimbirraha oo dhan. *"Oo ninkii baa magacyo u bixiyey xoolaha oo dhan, iyo haadda hawada, iyo dugaag kasta oo duurka jooga."* (Bilowgii 2:20).

Beertii Xaawa iyo Aadan ku noolaan jireen waxaa ku dhex yiil geedo badan oo qurux leh. Ilaah wuxuu amray Xaawa iyo Aadan oo ku yiri, *"Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaa: laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa."* (Bilowgii 2:16,17) Xaawa iyo Aadan waxaa loo sheegay inay beerta iska dhex joogaan oo ay sidii ay rabaan wax uga cunaan, laakiinse waxaa lagu amray inaynaan

waxba ku cunin geedka wanaagga iyo aqoonta si aynan kuwo xadgudbay ugu noqon.

Haddaba Shayddaan wuxuu aabbe u yahay xumaanta oo dhan, beenta iyo sharkaba. Oo Xaawa iyo Aadan buu la faqay oo ku yiri, "Si qumman baan idiin la talinayaa. Geedkaas mirihiisa cuna oo markaasaa indhihiinnu furmi doonaan". *"Oo markii naagtii aragtay in geedkii cunto ku wanaagsan yahay, oo indhaha u roon yahay, oo uu yahay geed loo doonayo in caqli lagu yeesho, ayay miro ka qaadatay, oo cuntay; ninkeedii la joogayna wax bay ka siisay, oo isagiina wuu cunay."* (Bilowgii 3:6) Shayddaan baa khiyaameeyay.

Markii Xaawa iyo Aadan ay geedka mirihiisii dhadhamiyeen, waxay ogandeen inay qaawan yihiin. Markaasay waxay bilaabeen inay caleemihii beerta iska toshaan si ay cawradooda u qariyaan. Isla markii ay mirihii goosteen ayay Ilaah ku dhega'adkaadeen. Kanii waa dembi. Ilaah baa iyagii u yeeray oo ku yiri, "Waa maxay waxan aad samaysay?" Naagtiina waxay tiri, *"Abeesadaa i khiyaanaysay, oo anna waan cunay"*. Ilaah markaasuu Shayddaan habaaray isagoo leh, *"Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa."* (Bilowgii 3:15)

llaah wuxuu Xaawa iyo Aadan u sameeyey dhar harag ah oo uu cawradooda ku qariyo. Neef baa la qalay oo haraggiisaa la siiyey inay guntadaan. Dembiga Xaawa iyo Aadan ay dembaabeen aawadiis waxaa u dhintay neef aan innaba xaq qabin, si iyaga wax lo huwiyo daraaddeed.

Ilaah iyagii beertii wuu ku ceyriyey, maxaa yeelay, way ku dhega'adkaadeen. Markaasaa Aadan waxaa khasab ku noqotay inuu aad u shaqeeyo oo uu dhulka qodo si uu cunto u helo.

Haddaba nin keliya dhega'adkaantiis aawadiis ayaa kulli dembilayaal lagu wada noqday. *"Haddaba sida dembigu nin keliya dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasaa dhimashadiina u gaartay dadka oo dhan, waayo, waa la wada dembaabay".* (Warqaddii Rasuul Bawlos u qoray dadkii Rooma 5:12) Innagu kulligeen waynu wada gefnay inaynu samayno wixii qummanaa. *"Dhammaan way wada dem-*

*baabeen."* (Rooma 3:23) Sidii Aadan oo kale waxaynu u baahan nahay hu. Xaawa iyo Aadan neef baa u dhintay si loo helo harag iyaga hu u noqda. Haddaba innaguna waa inaynu helnaa wax dembiyadeenna aynu ka huwano.

## Tijaabada Labaad

## Xaawa iyo Aadan

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Xaawa iyo Aadan waxaa lo oggolaaday
   B) inay miro ku cunaan geedkii aqoonta wanaagga iyo xumaanta mooyanne geedihii kale oo dhan.
   T) inay miro ku cunaan geedkii aqoonta wanaagga iyo xumaanta oo keliya.
   J) inay miro ku cunaan geedihii beerta ku yiil oo dhan. -----------
2. Ilaah Aadan wuxuu ku abuuray
   B) Qori.
   T) Feer.
   J) Dhoobo. -----------
3. Aadan wuxuu magacyo u bixiyey
   B) Xiddigaha.
   T) Xayawaanka iyo shimbirraha.
   J) Xayawaanka oo keliya. -----------
4. Ilaah Xaawa wuxuu ku abuuray
   B) Qari.
   T) Feer.
   J) Ciidda dhulka. -----------
5. Xaawa iyo Aadan waxaa beerta ka saaray
   B) Ilaah.
   T) Malaa'ig.
   J) Shayddaan. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Immisa qof baa dembaabtay?

   ______________________________________________

7. Yaa aabbe u ah xumaanta oo dhan, beenta iyo sharka?

   ______________________________________________

8. Yaa u dhintay in Xaawa iyo Aadan ay hu ka helaan.

   ______________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Xaawa iyo Aadan markay dembaabeen Ilaah bay ku dhega'adkaadeen. -----------

10. Innagu kulligeenba Ilaah waan ku dhega'adkaannay. -----------

## Dersiga Saddexaad

## QAABIIL YO HAABIIL

Ilaaha dunidan ku dhasha kii ugu horreeyey wuxuu ahaa wiil. Waalidkiis oo ahaa Xaawa iyo Aadan waxay u bixiyeen Qaabiil. Haddana waqti kaddib waxaa u dhashay wiil kale. Wiilkii labaad waxaa u bixiyeen Haabiil.

Markii labadii wiil oo walaalaha ahayd ay weynaadeen, waxay isku taxallujiyeen shuqullo kala duwan. Haabiil wuxuu jeclaaday inuu ilaaliyo idihii aabbihiis. Wuxuuna u foofin jiray meel naq badan oo wuxuu u aroorin jiray meel biyo leh. Weliba wuxuu ku celin jiray bahallada iyo dugaagga.

Qaabiil xoolaha iskuma uu taxallujin jirin. Wuxuu jeclaa inuu dhulka qodo oo uu beero, uuna isku fiirsada miraha iyo khudradda baxaysa.

Inkastoo ay shuqullo kala duwan lahaayeen haddana labadooduba waxay ku qiran jireen inay caabudaan Ilaaha runta ah. Waxay ku tashadeen inay Ilaah waqdhaac u bixiyaan, maxan yeelay, waxay rabeen inuu isagu iyaga wanaag u falo. Laakiinse waxay doorteen allabbariyo kala duwan. Qaabiil wuxuu aaday beertiisii, oo wuxuu dhulka ka soo guray khudrad, markaasuu allabbari ahaan Rabbiga ugu bixiyey. Haddii si loo eego Qaabiil allabbarigiisu, wuxuu ahaa dhididkiisii, waayo, isagu dhulkuu qoday oo wuu beeray oo mirihii buu soo guray markii ay bislaadeen. Wuxuuna noqday sidii mid Ilaah ku leh, “Bal eeg, waxanu waa wixii aan sameeyey e.”

Haabiil allabbarigiisii wuxuu ahaa mid kaas kulligiis ka duwan. Isagu wuxuu qalay wanaakiisii midkood oo wuxuu u bixiyey Ilaaha runta ah. Ilaah wuxuu ku farxay waqdhaacii Haabiil, wuuna aqbalay. Laakiinse Ilaah wuu diiday inuu aqbalo kii Qanbiil, maxaa yeelay, Qaabiil wuxuu keenay allabbari qalad ah oo aan qummaneen. Haabiil Ilaah buu aamminsanaa, laakiinse Qaabiil wuxuu ku kalsoonaa awooddiisa iyo shuqulka gacmihiisa.

Dabadeedna Qaabiil wuu hinaasay, maxan yeelay, Ilaah wuxuu aqbalay wankii Haabiil, laakiinse wuxuu diiday mirihii Qaabiil. Aad buuna

u carooday ilan uu ku tashaday inuu Haabiil dilo. Maalin maalmaha ka mid ah iyagoo beertii joogay ayaa Qaabiil wuxuu dilay Haabiil. Taasuna waxay ahayd diliddii qof la dilo dunida ugu horreeysay.

Ilaah aad buu Qaabiil uga xumaaday oo waxaa waajib ahayd in la ciqaabo. Kaddibna Ilaah Qaabiil wuu inkaaray sharkii iyo fidnadii uu sameeyey awgiis. Qaabiil inkaar baa ku dhacday intii cimrigiisa ka hartay oo dhan, maxan yeelay, walaalkiis buu dilay.

Qaabiil iyo Haabiil labaduba Ilaaha waaxidka ah oo keliya bay rumaysnaayeen. Oo labadooduba waxay qireen inay caabudaan Ilaahans runta ah. Qofna kuma dhana inuu iska rumaysto in Ilaah qura jiro. Kumana dhana inuu jeclaysto inuu caabudo Ilaaha runta ah. Sidii Hanbiil oo kale waa inaynu keennaa allabbari nooc qumman, haddii aynu doonayno in nala aqbalo. Qaabiil waxaa waajib ku noqotay inuu doorasho sameeyo. Waxayna ahayd inuu doorto allabbarigii uu doonayey inuu Ilaah u bixiyo. Laakiinse wuxuu ku tashaday inuu keeno mirihii dhulka, kuwaas oo muujinayey ficilladiisii. Wuxuuse doortay dorasho qalad ah.

Adiguna waa inaad doorasha samayso. Waa inaad goosato qurbaankii aad Ilaah u keeni lahayd caynka uu noqonayo. Waxaad samayn kartaa doorasha la mid ah sidii Qaabiil oo shuqullada gacmahaaga u keen Ilaah. Hase ahaatee, IIaah inama aqbalayo, mana yeeli doono innaba allabbariga caynkaasi oo kale ah. Waxaad yeeli kartaa sidii Haabiil oo kale, oo waxaad keeni kartaa allabbari Ilaah aqbalayo. Haddii aad doonaysid in Ilaah ku aqbalo, waa inaad u keentaa allabbari qumman oo Ilaah aqbalo.

**Tijaabada Saddexaad**

**QAABIIL IYO HAABIIL**

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Haabiil wuxuu aamminsanaa
   B) Shuqulladiisa.
   T) Qaabiil.
   J) Ilaah. -----------
2. Haabiil wuxuu rabay inuu noqdo
   B) Cayaartoy.
   T) Mid beerta qoda.
   J) Arijir. -----------
3. Ilaah wuxuu aqbalay Haabiil, maxaa yeelay
   B) Isagu wuxuu rumaystay in Ilaah keliya un inuu jiro.
   T) Isagu wuxuu ahaa wiil wanaagsan.
   J) Isagu wuxuu keenay waqdhaac qumman. -----------
4. Qaabiil wuxuu rabay inuu noqdo
   B) Cayaartoy.
   T) Mid beerta qoda.
   J) Arijir. -----------
5. Dilniinkii ugu horreeyey waxaa wax dilay
   B) Qaabiil.
   T) Haabiil.
   J) Aadan. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Qaabiil muxuu isku hallayn jiray?

   ______________________________________________

7. Haabiil muxuu Ilaah allabbari ahaa ugu keenay?

   ______________________________________________

8. Ilaab kumuu inkaaray?

   ______________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Qaabiil iyo Haabiilba Ilaah keliya bay rumaysnaayeen. -----------

10. Waa inaynu Ilaah u keennaa allabbarigii Qaabiil oo kale. -----------

## Dersiga Afraad

### NEBI NUUX OO KA WACDIYIHII XUKUNKA IMAANAYA

Nebi Nuux wuxuu dunida ku noolan boqollaal sana oo Qaabiil iyo Haabiil ka dambaysay. Sanooyinkaas kumaankun dad ah ayaa dunida ku dhashay. Dadkii dhulka degganaa waxay bilanbeen inay ku leexdaan Ilaaha runta ah. Markii Nuux dhashay dunida xaalkeedu aad iyo aad buu u xumaa. Dadkuna waxay isku bilaabeen nooca dembi ugu xun.

*"Rabbiguna wuxuu arkay in dadka sharkiisu ku badan yahay dhulka, iyo in male kasta oo fikirrada qalbigiisu ay shar keliya yihiin had iyo goorba."* (Kitaabkii kowaad ee Muuse oo la yiraahdo Bilowgii 6: 5) *"Ilaahna wuxuu arkay dhulha, oo bal eeg, wuu kharribnaa; waayo, inti jidh lahayd oo dhammu jidkooday ku kharribeen dhulka. Oo Ilaah wuxuu Nuux ku yiri, Intii jidh leh oo dhan dhammaadkoodii aan dhammayn lahaa ayaa gaaray; waayo, dhulkii waxaa ka buuxsamay dulmi iyaga xaggooda ka yimid, oo bal eeg, Iyagaan dhulka la baabi'in doonaa."* (Bilowgii 6:12-13)

Markaasaa Ilaah wuxuu nebi Nuux ku yiri, "Waxaad dhistaa doonni weyn". Taasu waxay ahayd wax Ilaah siiyey nebi Nuux iyo qoyskiisu inay kaga baxsadaan xukunka xun oo dhulka ku soo socotay. Intuu doonnida dhisayey, dadkii wuu wacdinayey. Wuxuuna dadkii uga digay xukunkii ku imaanayey Ilaah, oo wuxuu u sheegay in Ilaah xaqaani yahay oo uu iyaga dembigooda daraaddiis uu wada baabi'in doono. Wuxuu u sheegay inay toobad-keenaan oo ay Ilaah u soo noqdaan, oo ay dembigooda isku danyaan si uu Ilaah iyaga ugu naxariisto.

Laakiinse dadkii way diideen inay dhegaystaan wacdigiisii iyo digniintiisii. Way ku majaajilloon jireen, oo way ku qosli jireen.

Waxan la soo gaaray waqtigii nebi Nuux doonnidii dhammaystiray, oo markaasaa, *"Rabbigu wuxuu Nuux ku yiri, Adiga iyo dadka gurigaaguba soo gala doonnida; waayo, waxaan arkay adigoo qarnigan xaq ku ah hortayda."* (Bilowgii 7:1)

Ilaah ma uu rabin inuu wada baabi'iyo xayawaanka oo dhan iyo shimbirrahaba. Haddaba, si uu qaarkood u samatabbixiyo anwadeeed, Ilaah wuxuu nebi Nuux ku amray inuu doonnida soo geliyo mid lab iyo mid dheddig oo ka kooban bahal kasta iyo haad kasta. Haddaba dad waxaa doonnidii ku galay nebi Nuux iyo xaaskiisii iyo saddex-diisii wiil iyo wiilashiisa xaasaskoodii. Markaasaa Ilaah albaabkii xiray. Nebi Nuux iyo qoyskiisii iyo xayawaankiiba doonnida gudaheeda ayay ku jireen. Intii nebi Nuux farriintiisii diiddanayd dibadday joogeen.

Maalintii xukunka Ilaah way bilaabatay, roob baa samada ka soo shubmay oo dhulkii oo dhan daad baa qaaday. Dadkii waxay u carareen buuraha, laakiinse, *"Biyihiina aad bay ugu xoogaysteen dhulka; oo dhammaan buurihii dhaadheeraa oo samada oo dhan ka hooseeyey way qarsoomeen. Shan iyo toban dhudhun baa biyihii xagga sare xoog ugu kaceen; buurihiina way qansoomeen."* (Bilowgii 7:19-20)

Bal Ilaah muxuu dadka waxaa ugu sameeyey? Dembigooda aawadiis ayay u hafteen. Kuwii doonnida galay oo keliya ayaa laga badbaa-diyey daadkii dhimashada Ilaah u soo diray dhulka. Nuux iyo qoyskiisa ayaa doonnidaasi ku badbaaday. Kuwaasi dembaabay oo aan dhegaysan digniinta Ilaah way halaagmeen.

Xukunkii Eebbe ee ciqaabta ahaa waa roobkii e, wuu ku soo da'ay dadkii oo baabashay iyaga. Xukunkaas Eebbe ee roobka ahaa wuu soo shubmay oo ku da'ay doonnidii laakin dadkii saarnaa waa nabadga-leen. Doonnidii xukunkii ciqaabta ahaa ee Eebbe baa waxyeeleeyey, laakin dadkii saarnaa waxba ma gaarin.

Ilaah waa inuu ciqaabaa kuwa isaga ku dembaaba oo dhammi. Dadka oo dhammu waa dembilayaal oo waxay ku dembanbeen Ilaah. Maxaa yeelay, waad dembaabtay, waxaad ku silci doontaa xukanka Eebbe, haddii aadan sidii nebi Nuux oo kale, aadan lahayn meel aad ku magangasho. Ilaah wuxuu kuu diyaariyey meel aad ka magangasho si aad uga baxsato ciqaabtiisa. Adigu ma doonaysaa inaad ka badbaaddo xukunka Ilaah?

**Tijaabada Afraad**

**Nebi Nuux**

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. llaah wuxuu u sheegay nebi Nuux inuu sameeyo
   B) Doonni weyn.
   T) Ceel.
   J) Guri. -----------
2. Meesha keliya ee lagu magangali karay waxay ahayd
   B) Buuraha dushooda.
   T) Doonnida gudaheeda.
   J) Dhulka dushiisa. -----------
3. llaah wuxuu fiiriyey dadka banii-aadmiga oo wuxuu arkay inay
   B) Hallaysan yihiin oo dembaabeen.
   T) Wanaagsan yihiin.
   J) Dad wanaagsan noqon lahaayeen. -----------
4. Doonnidu waxay meel lagu magangalo u ahayd
   B) Nebi Nuux oo keliya.
   T) Xayawaanka oo keliya.
   J) Nebi Nuux iyo qoyskiisii iyo xayawaanka qaarkood. -----------
5. Intii nebi Nuux uu dadka wacdinayey
   B) Dadku waxay u maleeyeen inuu isagu yahay wacdiye wanaagsan.
   T) Waxay rumaysteen wixii uu iyaga u sheegay.
   J) Way ku majaajiloon jireen oo way ku qosli jireen. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Immisa qof baa Ilaah ku badbaadiyey daadkii?

   ______________________________

7. Immisa qof baa Ilaah ku dembaabtay?

   ______________________________

8. Doonnida albaabkeedii yaa xiray?

   ______________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Haddii aynu doonayno inaynu xukunka Ilaah ka baxsanno, waa inaynu helno meel magangal ah. -----------

10. Ilaah wuxuu diyaariyey meel aad dembi uga nabad gasbo. -----------

## Dersiga Shanaad

## NEBI IBRAAHIM OO AH MID ILAAH DOORTAY

Nebi Ibraahim* waxaa lagu yaqiinay iimaankiisa xoogga leh ee uu Ilaah u qabay. *"Maalin ayaa Ilaah nebi Ibraahim ku yiri, "Ka tag waddankaaga, iyo xigaalkaaga, iyo reerka aabbahaaba, oo dalka aan ku tusi doono u hac."* (Kitaabkii kowaad ee Muuse oo la yiraahdo Bilowgii 12:1) Ibraahim Ilaah wuu addeecay, oo wuxuu ka tegay dalkiisii, isagoo aan garanayn meesha Ilaah u hoggaaminayo. Ilaah wuxuu nebi Ibraahim ku yiri, *"Oo quruun weyn baan kaa dhigi doonaa, oo waan ku barakadayn doonaa, magacaagana waan weynayn doonaa, oo waxaad noqon doontaa barako. Oo waan barakadayn doonaa kuwa kuu duceeya, kan ku habaarana, waan ciqaabi doonaa: oo qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan"*. (Bilowgii 12:2-3)

Ibraanhim wuxuu dhalay laba wiil, magacyadoodana waxaa la kala oran jiray Ismaaciil iyo Isxaaq. Maalin baa Ibraahim isagoo tukanaya, *"wuxuu Ilaah ku yini, Waxaan jeclaan lahaa in Ismaaciil hortaada ku noolaado"* (Bilowgii 17:18). Ibraahim doonistiisa weynu waxay ahayd in Ismaaciil iyo carruurtiisu ay Ilaah barako ka helaan.

Ilaahna wuu u jawaabay oo wuxuu ku yiri, "Xagga Ismaaciilna waan ku maqlay; oo bal eeg, isaga waan barakadeeyey, waanan badin doonaa, oo aad baan u tarmin doonaa isaga; laba iyo toban amiir buu dhali doonaa, oo quruun weyn baan ka dhigi doonaa." (Bilowgii 17:20)

Ilaah wuxuu doonayan in Ismaaciil farcankiisu ay si qumman jaahiisa ugu noolaadaan. Wuxuu doonayan in qof kastaaba uu isaga jeclaado oo u adeego. Hase ahaatee, ma aqbali karo in caruurtiisu dembi galaan. Waa inay dembigooda ku mayrmaan. *"Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aammin iyo caadil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan."* (Warqaddii kowaad oo Rasuul Yooxanaa 1:9)

---

* Asal ahaan magaciisu wuxuu ahaa Aabraam, waaxase mar dambe Rabbigu magaciisii u beddelay Ibraahim.

Dersigan bilowgiisii waxaannu niri, nebi Ibraahim wuxuu caan ku ahaa iimaankiisii weynaa. Tijaabadii ugu weynayd oo Ibraahim iimaankiisii lagu tijaabiyey, waxay ahayd markii Ilaah weyddiistay inuu wiilkiisa allabbari ahaan u bixiyo.

*"Oo waxaa dhacay waxyaalahaas ka dib, in Ilaah tijaabiyey Ibraahim, oo uu ku yiri, Ibraahimow. Isna wuxuu yini, Waa i kan. Markaasuu ku yiri, Hadda kaxee wiilkaaga keligiis ah, kan aad jeceshahay, oo ah Isxaaq, oo u kac dalka Moriyaah; oo halkaas isaga sida allabbari la gubo ku dul bixi buunaha middood oo aan kuu sheegi doono."* (Bilowgii 22:1-2)

Ibraahim aroortii hore ayuu kacay oo wuxuu kooraystay dameerkiisii oo wuxuu kaxaystay laba ka mid ah dhallinyaradiisii. Kaddib markii ay saddex maalmood safrayeen ayuu nebi Ibraahim kor eegay oo meel fog ka arkay meeshii Rabbigu u sheegay. *"lbraahimna wuxuu raggiisii dhallinyarada ahaa ku yiri, Idinku halkan dameerka la jooga, aniga iyo wiilkuna halkoo baannu tegaynaa oo Ilaah ku soo caabudaynaa, dabadeedna waannu idinku soo noqonaynaa."* (Bilowgii 22:5)

Ibraahim iyo wiilkiisii intii ay u sii socdeen meeshii Ilaah doortay ayaa Isxaaq aabbihiis su'aal weyddiiyey, oo wuxuu ku yiri, Aabbow, allabbarigii wax kastaba waan u diyaarinay, neefkii sadaqada loo qali lahaa mooyaane. Markaasaa nebi Ibraahim wiilkiisii ku yiri, Wiilkaygiiyow Ilaah baa keeni doona wanka.

Markii ay gaareen meeshii Ilaah u sheegay, ayaa nebi Ibraahim wuxuu halkaas ka dhisay meel allabbariga *lagu* sameeyo, oo wuxuu kor saaray qoryihii uu waday. Markaasuu wiilkiisii xirxiray oo wuxuu dul saaray qoryihii. Kaddibna nebi Ibraahim billaawihiisii ayuu galka uga siibtay inuu wiilkiisii ku bireeyo. *"Markaasay malaa'igtii Rabbigu samada uga yeedhay isaga, oo waxay ku tiri, Ibraahimow, Ibraahimow. Kolkaasuu yiri, Waa i kan. Mankaasay ku tiri, Gacantaada ha saarin wiilka, waxbana ha ku samaynin: waayo, hadda waan garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid, maxaa yeelay, igama aadan lexejeclaysan wiilkaaga, kaas oo ahaa wiilkaaga keligiis ah."* (Bilowgii 22:11-12)

Markuu nebi Ibraahim foorarkii ku soo kacay ayuu arkay wan geesaha kayn kula jira. Markaasaa nebi Ibraahim wankii wuxuu ku qalay meeshii uu wiilkiisii ku qali lahaa. Wankiina wuxuu noqday wiilka

beddelkiisii. Wanku wuxuu ku dhintay meeshii wiilkii nebi Ibraahim. Wan aan xaqdarro qabin ayaa u dhintay eed uusan lahayn isagu.

Haddaba adigu waad dembowday. Ilaah dembi ma uu fiirsan karo. Waa inuu ciqaabo. llaah kuma aqbali karo innaba adigoo dembigaaga lagan qaado mooyaane. Adigu naftaada dembigaaga iska ma qaadi kartid oo isma caawiyi kartid. Ee waa inaad haysato mid kale oo kaa qaadaa.

Sidii wanku ugu dhintay beddelkii wiilkii nebi Ibraahim oo kale, adiguna waa inaad heshaa mid beddelkaaga ku dhinta. Beddelkaagu waa inuusan dembi lahayn. Waayo, haddii uu dembi leeyahay innaba dembigaaga kaama qaadi karo. Waxaad u baahan tahay mid aan isagu dembi lahayn oo dembigaaga ka qaada. Haddii aad leedahay mid sidaas oo kale ah, Ilaah wuu ku aqbali doonaa.

Ma doonaysaa inaad ogaatid mid waxaas kuu samayn kara? Sii baro buuggan oo waxaad ku akhrisan doontaa wax ku saabsan mid karo oo raalli ku ah inuu beddelkaaga u dhinto, oo adiga dembigaaga kaa furto.

## Tijaabada Shanaad
## Nebi Ibraahim

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Neefkii beddelkii wiilkii nebi Ibraahim u dhintay wuxuu ahaa
   B) Sac.
   T) Faras.
   J) Wan. -----------
2. Ilaah wuxuu ilmo Ismaaciil aqbali doonaa un
   B) Inta ay dembigooda ku socdaan.
   T) Marka dembigooda laga mayro.
   J) Marka samaantoodu ay ka badato xumaantooda. -----------
3. Ibraahim wuxuu caan ku ahaa
   B) Lacagtiisii.
   T) Geeliisii badnaa.
   J) Rumaysadkiisii uu Ilaah rumeeyey. -----------
4. Dembigeenna waxaa naga qaadi kara
   B) Shayddaan.
   T) Mid aan innaba dembi lahayn.
   J) Innaga laftigeenna. -----------
5. Kan aan innaba dembiga fiirin karin waa
   B) Ilaah
   T) Dadka.
   J) Malaa'ig -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Nebi Ibraahim wuxuu Ilaah ku baryey inuu wiilkiisa Ismaaciil helo?

   ______________________________________________

7. Kuwa nebi Ibraahim habaara, Ilaah muxuu u ballan qaaday?

   ______________________________________________

8. Tijaabadii ugu weynayd oo nebi Ibraahim iimaankiisa lagu tijaabiyey maxay ahayd?

   ______________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Ilaah wuxuu nebi Ibraahim u sheegay inuu wiilkiisa allabbari ahaan u bixiyo. -----------
10. Wanku wuxuu ahaa Isxaaq beddelkiisii. -----------

## Dersiga Lixaad

### NEBI MUUSE OO AH HOGGAAMIYAHA DADKA ILAAH

Nebi Muuse wuxuu ahaa mid ku mid ah hoggaamiyihii hore oo cajaa'ibka lahaa ee taariikhda soo mara. Wuxuu hoggaamiyey dad tiradooda ka badan tahay malyuun, oo wuxuu u hor kacay socdaal ku dhammaaday afartan sano. Maanta, hadduu nin dad sidaas u faro badan lamaddegaanka dhexdiisa mariyo, waxaa lagu xisaabi lahaa nacas weyn. Hase ahaatee, nebi Muuse wuu fuliyey hawshaas la mooday wax aan suurtaggal ahayn. Bal nebigaas madaxda ahaa oo weynaa, noloshiisii aynu faaqidno oo aan ku fekerno.

Nebi Muuse wuxuu ku dhashay dalka Masar. Waalidkiisna waxay ahaayeen addoomo reer banii-Israa'iil ah oo uu leeyahay Fircoonkii Masar. Boqorkaasu wuxuu amar ku soo saaray in addoomaha wiilashooda la wada dilo mar alla markii ay dhashaan. Muuse markii uu dhashay hooyadiis waxay ku baqday in laga dilo. Markaasay muddo saddex bilood ah aqalkeedii ku qarisay. Markii ay ugu dambayntii qarin kari waayday intaas ka badan, ayay abxad ama dambiil yar samaysay, oo intay daamur* korka ku marisay, ayay Muuse ku dhex ridday. Kolkaasay abxaddii webiga ku ridday oo raacisay biyaha. Kolkii cabbaar la joogay, ayaa gabadhii Fircoon waxay timid webiga, oo waxay aragtay abxaddii oo biyaha kor sabbeeynaysa. Markaasay soo qabatay oo abxaddii furtay oo waxay ka dhex heshay Muuse. Ina-Fircoon waxay diyaarisay naag u nuujisa naaska Muuse, waxayna ugu geeysay gurigeeda.

Haddaba nebi Muuse intii uu korayey wuxuu bartay tacliintii dalka Masar laga heli karay oo dhan. Wuxuuna noqday nin caqli badan. Nebi Muuse, in kastoo uu guriga Fircoon ku dhex koray oo uu joogay, haddana wuu ogaa inuusan isagu Masri ahayn. Maalin isagoo socda, ayuu arkay nin Masri ah oo addoon reer banii-Israa'iil ah garaacaya. Muuse taas aad buu uga carooday, maxaa yeelay, isaguba reer banii-Israa'iil buu ahaa. Markaasuu iska fiiriyey hareeraha oo goortii uu arkay inaan cidduna joogin, ayuu ninkii Masriga ahaa dilay. Haddaba Fircoon baa warkii maqlay, oo wuxuu damcay inuu Muuse dilo.

---

* ama laami

Laakiinse nebi Muuse wuu baxsaday oo baaddiyaha ayuu u cararay. Halkaasuu ku noolaa muddo afartan sannadood ah.

Maalin Muuse wuxuu arkay, isagoo ari la jooga, geed ololayey. Dabkaasuna wuu ka duwanaa dabkii kale oo uu arki jiray oo dhan, maxaa yeelay, dabku aad buu u ololayaa, laakiinse geedka ma guban. Muuse wuxuu u soo leexday inuu qummaati u fiiriyo, laakiin wuxuu maqlay cod u yeeraya oo ku leh, *"Muusow, Muusow!" Muuse wuxuu yiri, waa i kan. Markaasuu wuxuu ku yiri, Halkan ha u soo dhowaan, kabahana iska siib, waayo, meesha aad taagan tahay waa dhul qoduus ah."* (Kitaabkii labaad ee Muuse oo la yiraahdo Baxniintii 3:5)

Markaasaa Ilaah wuxuu Muuse u sheegay inuu maqlay qayladii addoomaha dalka Masar joogay, haatana uu rabo inuu iyaga samatabbixiyo. Ilaah wuxuu nebi Muuse ku yiri, *"... waxaan kuu diraydaa Fircoon, inaad dalka Masar ka soo kaxaysid dadkayga reer banii-Israa'iil ah"*. (Baxniintii 3:10)

*"Markaas Muuse wuxuu Ilaah ku yiri, "Bal yaan ahay anigu, markaan Fircoon u tegayo, oo aan reer banii-Israa'iil ka soo bixinayo dalka Masar?"* (Baxniintii 3:11) Ilaahna wuxuu ugu jawaabay, *"Xaqiiqa anigaa kula jiraya."* (Baxniintii 3:12)

Nebi Muuse wuu addeecay amarkii Ilaah oo wuxuu Fircoon weyddiiyey inuu addoomaha reer banii-Israa'iil faraha ku qaado oo iska sii daayo. Fircoon wuu ku qoslay nebi Muuse, oo wuxuu u sheegay in reer banii-Israa'iil aynan dalka Masar ka tegi karin innaba.

Markaas Ilaah wuxuu Masriyiintii ku saliday belaayooyin iyo masiibooyin, maxan yeelay, Fircoon baa reer banii-Israa'iil sii dayn waayey. Biyihii dhulkoo dhammi waxay isku beddeleen dhiig. Waxay yimid malyuunaad rah, injir, duqsi, iyo ayax oo u ku aafeeyey dhulkii oo dhan. Lo'dii oo dhan waxaa ku dhacay xanuun. Dadkii oo dhan waxay ku dhacay boogo xunxun ama dhullax. Cirkii oo dhammi waa madoobaaday, roob dhagaxyaale ah samada ayaa ka soo da'ay. Ilaah waxaas oo dhan wuxuu ugu soo diray Fircoonkii Masar sababtoo ah wuxuu sii dayn waayey addoomadii inay tagaan.

Kolkaasaa nebi Muuse wuxuu mar kale u tegay Fircoon oo wuxuu ku yiri, Adigu Ilaah band ku dhega'adkaatay, oo sidaa daraaddeed isagu hal aafu oo kale ayuu dadkaaga u soo dirayan, oo habeenbadhka ayaa reer kasta inankooda curadka dhiman doonaa.

Markaasuu nebi Muuse wuxuu addoomihii u sheegay inay waa yar qalaan oo ay dhiiggiisa mariyaan albaabadooda labadiisa udub iyo fooddiisa, oo hadday saas yeelaan, way nabad galayaan. Haddaba kolkuu Rabbigu soo dhex maray dalka Masar, wuxuu doonayey curaddada Masriyiinta, laakiinse wuu iska kor maray aqal alla aqalkii dhiigga la mariyeyba. Kaddib aqaladii aan dhiigga la marin oo dhan waxaa habeenkaas ka dhintay ilmihii curadka u ah. Ilaah wuxuu reer banii-Israa'iil ku yiri, Markii aan dhiigga arko ayaan iska kiin dhaafayan. Habeenkaas carruur faro badan baa dalkii Masar ku dhimatay, laakiinse reer banii-Israa'iil dhiiggii ay albaabadooda mariyeen awgiis ayay xukunkii dhimashada oo Ilaah kaga baxsadeen.

Qof kasta oo banii-aadan ah dhimasho ayuu ku xukaman yahay sidii Ilaah inoo sheegay. Haddaba adiguna sidaas oo kale ayaad dhimasho ku xukuman tahay. *"Mushahaarada dembiga waa dhimashada"* (Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadkii Rooma 6:23).

Waayo, waxaad tahay dembiile oo waa inaad dhimataa. Habase ahantee, Ilaah wuxuu kuu sameeyey jid aad xukunkiisa kaga baxsan kartid. Sidii addoomihii oo kale waa inaad dhiig marsataa oo aad ku noolaataa si uu Ilaah ku dhaafo markuu arko calaamadda dhiigga ah.

Sidee baad dhiigga u marsanaysaa? Dhiigga aad marsanaysaa waa noocee ama caynkee? Jawaabta dhaqsiyo ayaad u heli doontaa, ee sii baro buuggan.

## Tijaabada Lixaad
## Nebi Muuse

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Nebi Muuse
   B) Boqol qof ayuu Masar u kaxeeyey.
   T) Toban kun oo qof ayuu lamaddegaanka u kaxeeyey.
   J) Dad aan fara yarayn ayuu dalka Masar ka hor kacay oo ka bixiyey. -----------
2. Nebi Muuse wuxuu ku dhashay
   B) Lubnaan.
   T) Dalka Masar.
   J) Falastiin. -----------
3. Dembi mushahaaradiisu waa
   B) Bolol.
   T) Dhimasho.
   J) Janno. -----------
4. Ilaah wuxuu yiri, Dadka waan dhaafayaa markii aan arko
   B) Dhiig.
   T) Biyo.
   J) Wan. -----------
5. Ilaah wuxuu Fircoon u soo diray
   B) Nebi Nuux.
   T) Haabiil.
   J) Nebi Muuse. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Shaygii nebi Muuse arkay, isagoo ololaya, muxuu ahan?

   ______________________________________________

7. Yan diyaariyey dariiq ciqaabta dembiga laga baxsado?

   ______________________________________________

8. Maxan Ilaah inaga fogeeyey?

   ______________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Nebi Muuse wuxuu dilay nin Masri ah. -----------
10. Ilaah wuxuu aafo ku soo dejiyey addoomihii reer banii-Israa'iil. -----------

## Dersiga Toddobaad

### NEBI DAA 'UUD OO AHAA KU ILAAH KA DAMBEEYA

Nebi Danuud wuxuu ahaa nin muusikada ku wanaagsan oo jecel inuu heeso, qorona heesaha. Waxaa kaloo uu jeclaa inuu shareerada ku cayaaro oo uu heesahiisa ku heeso. Heesihii uu qoray qaarkood waxay inoo sheegaan wax ku saabsan waaya-aragnimaddiisii iyo waxyaalihii qabsaday.

Habeen cirku caad la'aan yahay oo xiddiguhu wada iftiimayaan, ayaa Daa'uud oo joogay bannaanka, isagoo idihii aabbihiis halkaasi la jiray, ayuu eegay cirka, wuxuuna arkay iftiimo badan oo wada dhalaalaya. Markaasaa wuxuu qoray hees:

*"Rabbiyow, Sayidkayagiiyow,*
*Magacaagu dunida oo dhan ku fiicnaa!*
*Waayo, sharaftaadii waxaad ka sarraysiisay samooyinka.*
*Markaan ka fiirsado samooyinka farahaaga lagu sameeyey,*
*Iyo dayaxa iyo xiddigaha aad amartay,*
*Bal waa maxay dadku oo aad u xusuusataa isaga?*
*Iyo wiilka aadanaha oo aad u soo booqataa?"* (Sabuurka 8:1,3,4)

Nebi Daa'uud wuxuu aad ula yaabay uumista Ilaah siday u weyn tahay. Isagu wuxuu garan waayey llaah adduunkan sameeyey sida uu banii-aadmiga isugu xiisanayo. Daa'uud wuxuu la yaabay markii uu gartay in Ilaaha dayaxa iyo xiddigaha uumay uu banii-aadmiga ammuurihiisa oo dhan isku xiisanayno.

Mar kale ayaa nebi Daa'uud wuxuu qoray wax ku saabsan Arijirkiisii Weynaa. Wuxuuna sheegay in Arijirkiisa Weyn isaga siiyey nolol barakadaysan. Oo wuxuu yiri:

*"Rabbigu waa arijirka i jira; waxba u baahan maayo.*
*Wuxuu i fadhiisiiyaa doog qoyan dhexdiis,*
*Oo wuxuu ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda.*
*Naftayda wuu soo celiyaa.*
*Oo magiciisa aawadzis wuxuu igu hor kacaa*
*waddooyinka xaqnimada."* (Sabuurka 23:1-3)

Isla sabuurkans qudhiisa wuxuu ku sheegay <u>dhimasho barakadaysan</u> Wuxuu yiri,
*“In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada,*
*Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa,*
*Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya.”* (Sabuurka 23:4)

Sabuurkaas wuxuu ku soo koobay inuu rajo weyn ka qabo aakhiro suubban. Wuxuu yiri:

*“Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis,*
*Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan doonau.” (Sabuurka 23:6)*

Nebi Danuud wuxuu lahaa raja wanaagsan. Wuxuu u lahaa <u>nolol barakadaysan</u>. Wuxuuna ogaa inuu helayo <u>dhimasho barakadaysan</u> oo wuxuu ogaa inuu <u>dhimashadiisa dabadeed nolosha barakadaysan</u> tegi doono. Adigu ma leedahay rajadaas oo kale? Waad lahaan kartaa haddii aad sidii nebi Daa’uud oo kale u doonaysid inaad Ilaah dembigaaga dhaafo. Nebi Daa’uud Ilaah  ayuu u qayshaday, isagoo leh:

*“Ilaahow, iigu naxariiso sida raxmaddaadu tahay,*
*Oo xadgudubyadaydana igaga tirtir sida naxariistaada*
*badnaanteedu tahay.*
*Xumaantayda iga wada mayr, oo iga nadiifi dembigayga.”*
(Sabuurka 51:1,2)

Nebi Daa’uud wuxuu marar badan sabuurradiisii ku sheegay nin dhimasho aad u xun oo xanuun badan leh ku dhiman doona. Wuxuu sii sheegay mid lagu majaajilloon doono, oo la yasi doono, oo si xaasidnimo ah loo dili doono. Taasna wuxuu ka yiri:
*“Laakiinse waxaan ahay dixiri, oo dad ma ihi,*
*Waxaan ahay mid la caayo, oo dadku quudhsado...*
*Oo kuwa i arka oo dhammu way igu qoslaan,*
*Oo lafahaygii oo dhammuna xubnihii waa ka kala bexeen.*
*Waayo, waxaa i hareereeyey eeyo,*
*Oo waxaa hareerahayga isku wareejiyey shirkii xumaanfalayaasha,*
*Oo waxay iga mudeen gacmaha iyo cagaha.*
*Lafahaygii oo dhan waan tinn kanaa,*
*Dharkayga bay qaybsadaan, Oo maradaydana saami bay u ritaan.”*
(Sabuurka 22:6,7,14-18).

*"Oo markaan harraadsanaana waxay i cabsiiyeen khal."* (Sabuurka 69:21.)

*"Xadhkihii dhimashada ayaa i hareereeyey,*
*Xanuunkii She'oolna waa i qabsaday".*
(Sabuurka 116:3).

Nebi Daa'uud yuu ka sheekaynayey markii uu waxyaalahaas lahaa? Waayo nafsaddiisa kama uusan hadlayn markuu waxyaalahan lahaa, isagana kuma aanay dhicin xanuun-nadaas. Nebi Daa'uud wuxuu ka sii warramayey mid dembiyadeenna aawadood u dhiman doonaa. Buuggan sii baro, waxaad ku baran doontaa mid u dhintay inuu dembigaaga kaa wada cafiyo aawadeed.

## Tijaabada Toddobood
## Nebi Daa'uud

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Nebi Daa'uud wuxuu xannaanayn jiray
   B) Idihii aabbihiis.
   T) Lo'dii aabbihiis.
   J) Fardihii anbbihiis. -----------
2. Nebi Daa'uud wuxuu tumi jiray
   B) Shareero.
   T) Buun.
   J) Biibiile. -----------
3. Nebi Daa'uud wuxuu sii sheegay
   B) Mid farxad ku buuxi doona.
   T) Mid yasid aawadeed loogu qosli doono.
   J) Mid biyo la siin doon si uu u cabbo. -----------
4. Nebi Daa'uud wuxuu garan waayey waxa Ilaah
   B) Uu dadka isugu xiisanayo.
   T) Uu samooyinka u sameeyey.
   J) Uu dhulka u sameeyey. -----------
5. Nebi Daa'uud waxaa uu ku hadlay
   B) Nolol barakadaysan iyo aakhiro belaaysan.
   T) Nolol barakadaysan iyo dhimasho belaaysan.
   J) Nalol barakadaysan, dhimasho barakaysan iyo aakhiro barakaysan. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Nebi Daa'uud dooxadee buu yiri, *"...aan ku dhex socda. "*..?

   ________________________________________
7. Nebi Daa'uud yuu arijirkiisa ku tilmaamay?

   ________________________________________
8. Nebi Daa'uud muxuu ula jeeday markuu yiri, *"...cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona"*?

   ________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Nebi Daa'uud wuxuu qoray heeso. -----------

10. Ilaah wax kasta wuu yaqaan. -----------

# Dersiga Siddeedaad

## SAYID CIISE MASIIX

Toddobadii dersi ee hore waxaynu ka soo barannay waxyaalo badan oo run ah oo lagamamaarmaan ah. Haddaba bal aynu waxyaalahaas dib u fiirinno.

1. **Dersigii kowaad oo ku saabsanaa Ilaah keliya.**
   Dersigaas waxaynu ku aragnay in Ilaaha runta ahu uu dunida uumay. Waxaynu kaloo barannay dabeecooyinka IIaah qaarkood. Ilaah wuu naxariis badan yahay, oo naxariistiisa badan aawadeed ayuu inoogu naxariisan karaa.

2. **Dersigii labaad oo ku saabsanaa Xaawa iyo Aadan.**
   Waxaan isna ku barannay qisadii Xaawa iyo Aadan oo dembaabeen markay Ilaah ku dhega'adkeen. Waxaynu aragnay sidii Ilaaha naxariista badanu ugu keenay wax ay xirtaan. Neef aan dembi qabin ayaana u dhintay inuu haraggiisa ay Xaawa iyo Aadan xiran lahaayeen noqdo.

3. **Dersigii saddexaad ee ku saabsanaa Qaabiil iyo Haabiil.**
   Dersigan waxaynu ku barannay inaynu Ilaah u keenno allabbari qumman si uu inoo aqbalo aawadeed. Kaasoo aan ahayn allabbarigii Qaabiil oo kale (shaqadiisa), maxaa yeelay, Ilaah aqbali maaya allabbarigaas oo kale. Waa inuu ahandaa sidii allabbarigii Haabiil (waqdhaaca dhiigga leh) oo kaIe. "Dhiig daadin la'aanteed dembidhaaf ma jiro."

4. **Dersigii afraad oo ku saabsanaa nebi Nuux.**
   Wixii nebi Nuux xukunkii halaagga ee Ilaah uga magangalay waxay ahaayeen doonni. Innaguna waa inaynu xukunka Ilaah ee ciqaabta dembiga magangal ku helnaa.

5. **Dersigii shanaad oo ku saabsanaa nebi Ibraahim**
   Dersigan waxaynu ku aragnay in wan dhintay meeshii wiilkii Ibraahim ku dhiman lahaa. Wanku beddel buu isaga u ahaa, sidaas oo kale innaguna waa inaynu beddelaad helnaa.

6. **Dersigii Lixaad oo ku saabsanaa nebi Muuse.**
   Dersigan waxaynu ka barannay sidii addoomihii reer banii-Israa'iil ay masiibada kaga baxsadeen. Iyagu dhiig bay mariyeen albaabadii aqaladooda. Haddaba innaguna waa inaynu dhiig helno si aynu kaga baxsanno xukunka Ilaah.

7. **Dersigii toddobaad oo ku saabsanaa nebi Daa'uud.**
   Nebi Daa'uud wuxuu ku hadlay midka dembigeenna u silci doona. Haddii aynu doonayno in Ilaah ina aqbalo, waa inaynu helno mid karaya inuu kaamilo waxyaalaha looga baahan yahay oo dhan.

   Qofkaasu waa inuu noqdo haraggii huwiska Xaawa iyo Aadan la huwiyey oo kale.
   Qofkaasu waa inuu noqdaa sidii allabbarigii Hanbiil Ilaah u keenay oo kale.
   Qofkaasu waa inuu noqdo meel la magangalo sidii doonnidu ay magangalka ugu noqotay nebi Nuux iyo qoyskiisii.
   Qofkaasu waa inuu noqdaa beddel sidii uu wankuba beddel ugu noqday wiilkii Ibraahim oo kale.
   Qofkaasu waa inuu dhiig marsadan sidii ay addoomuhu dhiigga albaabkooda u mariyeen qarnigii nebi Muuse oo kale.
   Qofkaasu waa inuu la yimaadan waxyaalihii uu nebi Daa'uud sii sheegay oo dhan, in lagu majaajillooday oo la yasay oo la dilay, isagoo gacmaha iyo cagaha laga daldalooliy Ey.

   Bal, qofkaasii yuu noqona karaa? Ma garanaysaa qof waxaas oo dhan ka soo bixi kara? Waxaa jira qof wada kaamili karo waajibaadka laga rabo. Qofkaasuu waa Ciise Masiix. Ma jiro qof kale oo heerka gaari karaa. Ilaah wuxuu yiri, *"Mid kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay, ma jiro magac kale samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyey oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno."* (Falimaha Rasuullada 4:12)

   Goormuu Ciise Masiix waxyigaas oo dhan oofiyey? Goormuu harag huwin ahaa? Goormuu beddel ahaa? Goormuu dhiig marsaday? Ma intuu noolaabaa? Maya. Isagu waxba dhiig ma u marsan intii uu noolaa.

Haddaba goormuu waxyaalahaa oo dhan wada sameeyey? Hal jawaab oo qura ayaa jirta taasuna waa: Markii iskutallaabta lagu qodbay. Markuu dhintay ayuu hugeenna noqday. Markuu dhintay ayuu allabbari noqday. Markuu dhintay ayuu dhiig marsaday. Markuu dhintay ayuu wada kaamilay wixii ay sii sheegeen Aadan iyo Haabiil, nebi Nuux, nebi Ibraahim, nebi Muuse iyo nebi Daa'uudba.

Sidaas daraaddeed Masiixa waxaa hal mar loo bixiyey inuu qaado dembiyada kuwa badan. Dhiigga Ciise Masiix, oo ah Inankii Ilaah, wuxuu innaga nadiifiyaa dembi oo dhan.

Dhimashadiisu guuldarro ma ay ahayn, laakiinse guul weyn bay ahayd. Dhimashadiisu guul weyn bay ahayd, maxaa yeelay, markaasay adiga kuu suurowday in Ilaah ku aqbalo. Dhimashadii Ciise Masiix mooyaane, si kale oo Ilaah kuu aqbali karaa ma jirto. Ilaah wuxuu kaa doonayan inaad qalbiga ku aqbashid dhimashadii Ciise Masiix, haddii kale, weligaaba waad hallignaanaysan.

Dhimashadii Ciise Masiix ma aysan ahayn dhammandkiisii. Ilaahay wuu ka sara kiciyey dhimashadii. Taansu waxay ahayd waqti la yaab leh oo taariikhdu caddaysay. Ciise Masiix wuxuu ka soo sara kacay kuwii dhintay oo wuxuu ku noqday jannada oo wuxuu la joogaa Eebbe.

Haddaba adiga waxaa kuu eg in Ciise Masiix aad u aqbashid inuu yahay beddelkaagii kuu dhintay. Waa inaad Ilaah ku tiraahdan, *"Ilaahow, anigu dembi baan qabaa, oo waxaan doonayaa inaad adigu i aqbashid. Waan ogahay in sida keliya oo aad igu aqbali kartaa ay tahay inaan Ciise Masiix u aqbalo beddelkayga. Waan ogahay inuu isagu bixiyey qaamihii dembigayga oo dhan."*

Haddii aad sidaas tiraahdid oo ay daacad ka tahay, Ilaah wuu ku aqbali doonaa. Markii aad saas yeeshid, waxaad dooni doontaa inaad ku noolaato nolol aammin ah oo nadiifsan. Ilaah wuu kugu caawimi doonaa inaad nolol saas oo kale ah ku noolaato. Haddii aadan Ciise Masiix aqbalin weligaaba waad hallignaan doontaa.

Haddii aad doonaysid inaad waxyaalahan sii ogaatid,
sii baro buuggan!

## Tijaabada Siddeedaad
## Sayid Ciise Masiix

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Anigu waxaan ahay
   B) Qof xaqaani ah.
   T) Mid Ilaah u aqbali karo sida uu yahay.
   J) Dembile. -----------
2. Ciise Masiix wuxuu u dhintay sidan
   B) Shil oo kaleeto.
   T) Beddelkayaga oo kale.
   J) Masaal inaynu u kaalmayno dadka kale oo keliya. -----------
3. Dhimashadii Clise Masiix waxay ahayd
   B) Guuldarro.
   T) Guul.
   J) Masiibo inuu ku leexdo oo uu isku dayey. -----------
4. Dembigayga oo dhan waxaa iga nadiifin karaa
   B) ficilladayda wanaagsan.
   T) Diintayda.
   J) Dhiigga Ciise Masiix. -----------
5. Haddii aynan hadda aqbalin dhiigga Sayidka Ciise Masiix
   B) Nolol wanaagsan baynu ku noolann karnaa, Ilaah waa ina aqbali karnaa.
   T) Aakhiro aynu ku heli doonnaa.
   J) Waynu hallignaan doonnaa weligayba. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Xaawa iyo Aadan waxay lahaayeen harag ay ku huwadaan.
   Innaga haragga huwiskeennu waa ayo?

   ______________________________________________

7. Haabiil allabbari la aqbali karo ayuu bixiyey.
   Innaga allabbarigeennu waa ayo?

   ______________________________________________

8. Waxyaalihii nebi Daa'uud sii sheegay oo dhan yaa kaamilay?

   ______________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Ciise Masiix wuu ka soo sara kacay kuwii dhintay. -----------
10. Haddii aan doonayo in uu Ilaah i aqbalo, waa inaan rumaysto Ciise Masiix inuu yahay beddelkaygii oo aan aqbalaa. -----------

# Dersiga Sagaalaad

# DEMBI

Dembi waa cadowgeenna kan u xun. Wuxuu kaa celin doonaa in Ilaah ku aqbalo. Wuxuu kaa celin doonaa jannada geliddeeda. Wuxuuna kugu ridi doonaa cadaabta. Haddaan dembigaaga la cafiyin waxaa lagaa fogayn doonaa Ilaah runta ah. Bal yaa dembiyo cafiyi kara, Ilaaha keliya mooyee? Bal ogow, xagga Ciise Masiix ayaa si aad dembidhaaf u hesho, kugu wacdiyey cafinta dembiga.

**WAA MAXAY DEMBI?**

Dembigu gaf oo keliya ma ahan. Dembi dabeecad xuma oo keliya ma aha. Dembi waa gaarid la'aan aan gaari kari waaynay xaqnimada Eebbe. Haddii aynaa wada kaamilin xaqnimada Ilaah wax alla wixii aan niraahno iyo wixii aan samaynaba waynu ku dembaabnay. Dadka oo dhammi way wada dembaabeen. Ilaah  wuxuu yiri, "Dembi waa sharci darro". Haddii aynu hal mar oo keliya sharciga Ilaah jebinno waynu dembaabnay. Haddii aan Ilaah ku caasiyoowno waynu dembaabnay. Waxaynu dembaabnaa markii aynu feker xun ku fekerno, ama aynu erayo xunxun niraahno, amase aynu samayno waxyaalo aan Ilaah jeclayn.

**IMMISA QOF BAA DEMBAABAY?**

Nebi Daa'uud wuxuu yiri, *"Bal eeg, aniga waxaa laygu qabanqaabiyey xumaan, oo waxaa hooyaday igu uuraysatay dembi."* (Sabuurka 51:5) Nebi Daa'uud wuxuu ahaa dembile.

Ilaah wuxuu yiri, *"Dhammaan way wada dembaabeen... "* (Warqaddii Rasuul Bawlos u qoray dadkii Rooma 3:23). waxaa jira qof qura oo aan weligiis dembaabin. Qofkaasna waa Ciise Masiix. Waxaa qoran, *"In kastoo uusan dulmi samayn, khiyaanona aanay afkiisa ku jirin."* (Kitaabkii Ishacyaah 53:9) *"Wuxuu isaga oo aun dembi aqoonin ka dhigay inuu dembi noqdo aawadeen, inaynu noqonno xaqnimada Ilaah ee ku jirta isaga."* (Warqaddii labaad ee Rasuul Bawlos u qoray dadkii Korintos 5:21)

*"Oo idinku waad og tihiin in isagu u muuqday inuu dembiyadeenna inaga qaado, oo isagu dembi ma leh."* (Warqaddii kowaad oo Yooxanaa 3:5) Sayidka Ciise Masiix mooyanne qof kastaba waa dembile. Tan iyo markii Aadan laga soo bilaabo iyo ilaa ilmaha yaryar oo haddeer dhashay, banii-aadmiga oo dhammi wuu wada gaari waayey xaqnimada Rabbiga.

**WAA MAXAY DEMBIGA CIQAABTIISU?**

*"...mushahaarada dembigu waa dhimashada."* (Warqaddii Rasuul Bawlos u qoray dadkii Rooma 6:23) Aadan daqiiqaddii uu dembaabay ayuu xagga ruuxa ku dhintay. Ilaah buu ka go'ay. Aadan wuxuu dhaxal u helay dhimasho xagga jirka ah. In kastoo uusan isla markiiba dhiman, waxaa lagu xukumay inuu aakhirka dhinto. Innaguna sidaas oo kalaynu nahay. Innaguna dembigeenna awadiis aynu heli doonaa waxaynu galabsanno. Mushahaaraddeenuna waa dhimasho. Taas micneheedu waxaa weeye inaynu Ilaah ka fogaan doonno oo aynu dembigeenna aawadiis naarta geli doonno.
Waa inaynu helnaa jid wanaagsan oo aynu naarta kaga baxsanno.

**SIDEE BAAN DEMBIGAYGA UGA XOROOBI KARAA?**

Waxaan dembigayga kaga xoroobi karaa haddaan Ciise Masiix weyddiisto inuu ii noqdo Badbaadiyahayga iyo Sayidkayga. Sayidkayga Ciise Masiix ayaa dembiyadeennii wuxuu ku qaaday jirkiisii iskutallaabta saarnaa.

Bal aynu waxyaalahan ka fekerno:

1. Kulligeen waxaynu nahay dembiileyaal. *"Waayo, dhulka laguma arko nin xaq ah oo wanaag fala, oo aan dembaabin. " (*Wacdiyaha 7:20)

2. Ilaah waa qoduus oo dembi ma fiirin karo. *"Waxaad tahay mid indhihiisu ka sii daahirsan yihiin inay war shar ah eegaan, oo qalloocna ma fiirin kartid..."* (Xabaquuq 1:13)

3. Weligeen Ilaah waannu ku fogaan doonnaa haddii aan dembi-yadeenna la cafiyin. Ilaah wuxuu innagu oran doonaa, *"Weligay idinma aqoon, iga taga, dembifalayaalow."* (Injiilka sida Matayos u qoray 7:23)

4. Ciise Masiix wuxuu u dhintay inuu dembiga cafiyo aawadeed. *"Waayo, innagoo weli itaal daran ayuu Masiixu wakhti qumman u dhintay kuwa aan cibaadada lahayn."* (Rooma 5:6)

5. Ilaah wuxuu inoo sheegay in haddii aynu Ciise Masiix u aqbalno sida badbaadiyaheenna oo kale, uu inoo dembidhaafi doono. *"Ilaah intuu dunida jacayl u qabay, ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin, laakiinse uu lahaudo nolosha weligeed ah."* (Injiilka sida Yooxanaa u qoray 3:16)

Ilaah wuxuu inoo sheegay inuu uro JID KELIYA uu inagu aqbali karo. Jidkaasuna waa in la aammino Ciise Masiix. Ma doonaysan in dembigaaga lagaa cafiyo? Ilaah  weyddiiso inuu ku cafiyo oo u sheeg inaad rumaysanaysid Sayidka Ciise Masiix.

Hadda yeel, Ilaah weyddiiso.

## Tijaabada Sagaalaad
### Dembiga

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Cadowgaaga u weyn waa
   B) Jirro.
   T) Dembi.
   J) Murug. -----------
2. Dembi waa
   B) Gaf la sameeyo.
   T) Dabeecad xun oo keliya.
   J) Ilaah xaqnimadiisa oo aan la gaari karin. -----------
3. Dembiga ciqaabtiisu waa
   B) Jirka dhimashadiisa oo keliya.
   T) In dembiluhu waqti yar ku xanuunsado cadaabta.
   J) Ciqaab daa'imisa ah oo Ilaah laga fogaanayo. -----------
4. Qofka keliya ee aan weligiis dembaabinu waa
   B) Aadan.
   T) Nebi Ibraahim.
   J) Sayid Ciise Masiix. -----------
5. Nebi Daa'uud wuxuu ahaa
   B) Nin kaamil ah.
   T) Mid dembi leh.
   J) Malaa'ig. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Yan u dhintay inuu dembiga cafiyo?

   ______________________________________________

7. Yaa Qoduus ah oo aan dembiga fiirsan karin?

   ______________________________________________

8. Sidee baan u noqon karaa mid Ilaah aqbali karo?

   ______________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Ilaah wuxuu inoo sheegay inuu ina cafiyi doono, haddii aynu Ciise Masiix rumaysanno oo aqbalno inuu yahay badbaadiyaheenna. -----------
10. Dadka oo dhammi waa wada dembaabay. -----------

## Dersiga Tobnaad

# DUCADA IYO CAMALKA SAN

Ducadu ama tukashadu waa quwad weyn oo banii-aadmigu uu yaqaan midkood. Duco baynu kaga adkaan karnaa dhibaatooyinka la moodo inaan laga adkaan karin. Soohdimo adduunka ka dhexeeya oo aan laga tallaabi karin baa duco kaga gudbi karnaa. Habase ahaatee, intaynan ducada gelin waa inaynu kaamilnaa waxyaalaha laynaga doonayo.

1. **Baryadaadu waa in la baryaa kan saxa ah.** Ilaahyada dhagaxyada ahu baryo ma maqli karaan. Ilaahyada qoryaha ahu duco garan mayaan. Ilaah keliya oo baryo maqla oo ka soo jawaabaa waa Ilaaha nool oo runta ah. Ilaahii Sayidka Ciise Masiix u soo diray si uu banii-aadmiga aawadiis ugu dhinto, weeye kan ay waajibka kuugu tahay inaad u tukatid.

2. **Baryadaadu waa inay daacad ahaataa.** Waa inaadan Ilaah weyddiisan inuu aad taajir kaaga dhigo. Waxaa suurtowda in Ilaah doonin inaad taajir noqotid. Kuwan waa dhawr baryo ama tukasho oo Ilaah aqbali karo:

    1. Ilaahow, ii naxariiso, dembile baan ahay.
    2. Ilaahow, i caawi si aan u garto waxaad damacday naftayda.
    3. Ilaahow, iga caawi si aan ugu noolaado nolol nadiif ah oo markhaatifur aan kaaga noqdo dadka xaggaaga.

    Ilaah wuxuu maqlaa oo ka soo jawaabaa ducooyin badan oo kale. Wuxuuna doonayan inaad dhibaatooyinkaaga u keento. Wuxuu rabaa inuu noloshaada dhan kastaba u hoggaamiyo.

3. **Baryado waa inay waafaqsanaataa waxa Ilaah rabo.** *"Oo tanu waa kalsoonaanta aynu isaga u qabno taasoo ah haddaynu wax un doonistiisa ku barinno, isagu wuu ina maqlaa."* (Warqaddii kowaad oo Yooxanaa 5:14) Ilaah wuu maqlaa, wuuna u jawaabaa kuwa Sayidka Ciise Masiix aqbalay. Waxaa suurtowda inuusan baryadeenna ka soo jawaabin markiiba. waxaa suurtowda oo kale inuusan baryadeen-na uga soo jawaabin sida aynu doonayno. Habase ahaatee Isaga

wuu og yahay waxaa inoo wanaagsan oo baryadeennana wuxuu uga jawaabi doonaa si qumman.

4. **Waa in lagu ducaystaa magaca Ciise Masiix.** Ciise Masiix oo keliya ayaa ah dhexdhexaadiyaha, Ilaah iyo dadka u dhexeeya. Ciise Masiix qudhiisu wuxuu yiri: *"...wax alla waxaad Aabbaha magacayga ku weyddiisataan, uu idin siiyo."* (Injiilka sida Yooxanaa u qoray 15:16)

Ma doonaysaa in ducadaada laga soo jawaabo?
XUSUUSNO waxaa laga rabo:
**Tan kowaad:** Waa inaad baridaa kan saxa ah.
**Tan labaad:** Waa inaad baryadaadu daacad ahaataa.
**Tan saddexaad:** Waa inaad u ducaysataa siduu Ilaah raalli ka yahay.
**Tan afraad:** Waa inaad ku ducaysataa magaca Ciise Masiix.

**CAMAL SUUBBAN**

Camalka suubban waa Iagamamaarmaan, in qof kasta noloshiisu lahaato. Wax yar mooyaane, qof waliba ee jiri jirayba wuxuu sameeyey ficillo wanaagsan. Qaar baa waxay caawiyeen dad jirran. Qaarna waxay sadaqo siiyeen masaakiinta. Qaar waxay u naxariisteen cadaawayaashooda. Waxyaalahaas oo dhammu waa camallo suubban. Habase ahaatee, camalladaa wanaagsan xataa midka mid ah kaama yeelo inaad xagga Ilaah qummaatidid. Nebi Ishacyaah wuxuu ku yiri, *"...xaqnimadayada oo dhammuna waa sida dhar wasakh ah ...."* (Kitaabka Ishacyaah 64:6) Waxaa wax ugu wanaagsan oo aan samayn karnaa ay Ilaah hortiis ku yihiin, sidii calalo wasakh ah oo kale.

Waxaa suurtaggal ah inaad ducaysatid oo aad shuqul wanaagsan samaysid habeen iyo maalinba oo aad haddana cadaabta gashid. Waayo, ducada iyo camalka suubbani ma aha sida Ilaah wax ku aqbalo. Sida keliya oo Ilaah wax ku aqbalo waa inaad Ciise Masiix aammintid.

Markaad Ciise Masiix aqbasho waa muhiim inaad camal wanaagsan samayso. Markaad Sayidka Ciise Masiix weyddiisatid inuu ahaado taliyaha noloshaada waa inaad isaga ka farxisid oo aad u noolaatid.

*"... mana aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin."* (Warqaddii Rasuul Bawlos u qaray dadka Efesos 2:9). Sababta Ilaahi inoogu diidayo in aynu dembidhaafkeenna shaqaysanno, waa si aanan loogu faanin. Maanta Ilaah wuxuu dembidhaafka siinayaa qafka u qaadanaya hadiyad ahaan oo kale. Dembidhaafkaas oo aan lagu heli karin shaqo ama duco, laakiinse lagu heli karo aqbalidda Ciise Masiix oo keliya. *"Waayo, idinku waxaad ku badbaadeen nimco xaggo rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah,"*
(Efesos 2:8-9)

## Tijaabada Tobnaad
## Ducada iyo camalka san

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Baryada waa in la baryo
   B) Ilaahyo badan.
   T) Nin kasta.
   J) Ilaah, laguna baryo xagga Ciise Masiix oo uu soo diray isaga. -----------
2. Ilaah wuxuu ku jawaabi doonaa ducada caynkan oo kale ah
   B) Ilaahow, ii naxariiso, anigu dembile baan abay.
   T) Ilaahow taajir iga dhig.
   J) Ilaahow i caawi si aan madaxweyne ku noqdo. -----------
3. Ilaah wuxuu yiri, 'Shuqulkeenna wanaagsanu waa..."
   B) Wax isaga kua farxiya."
   T) Sidii dhar wasakh ah."
   J) Mid ina geyn doona jannada." -----------
4. Dembidhaafka
   B) Waxaa lagu heli karaa shuqul wanaagsan.
   T) Waxaa lagu heli karaa lacag Ia bixiyo.
   J) Waa hadiyad. -----------
5. Markii Ciise Masiix kuu noqdo taliyaha noloshaada, waa
   B) Inaad isaga ku farxisid oo aad Isaga u noolaatid.
   T) Inaad iskaga istareexdid raaxaysiga dunida.
   J) Inaad lacag fara badan lahaataa. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Ilaah muxuu hadiyad ahaan u bixinayan maanta?

   ________________________________________

7. Jidka keliya ee Ilaah kugu aqbali karaa waa maxay?

   ________________________________________

8. Markaan Ciise Masiix aqbalo maxaa igu waajib ah inaan sameeyo?

   ________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Ducadu waa quwadda weyn oo uu banii-aadmigu yaqaan mid ku mid ah. -----------
10. Ciise Masiix waa dhexdhexaadiyaha keliya oo u dhexeeya Ilaah iyo banii-aadmiga. -----------

## Dersiga Kow-iyo-tobnaad

## WAXYAALAHA DHICI DOONA

Qof kastaba wuxuu doonayaa inuu ogaado waxyaalaha soo socda ee dhici doona mustaqbalka. Dad badan ayaa isku dayey inay wax ka sii sheegaan waxa dhici doona, laakiinse Ilaah keliya ayaa wax kasta garanaya. Habase abantee, wax yar ayuu isagu moo sheegay.

**IMAATINKA CIISE MASIIX**
Waxyaalaha Ilaah inoo sheegay inay dhici doonaan mustaqbalka, waxaa ka mid ah in Sayidka Ciise Masiix dadkiisa uu u soo noqon doona si uu jannada ugu qaado. Kuwii isaga aamminay oo dhammu waxay ku rayrrayn doonaan inay isaga jannada la joogi doonaan. Kuwii aan isaga aamminsaneen, waxaa laga qarin doonaa jaahiisa. Innagu garan mayno Ciise Masiix markuu soo noqon doono. Haddii uu maanta soo noqdo, adigu diyaar ma u tahay? Markuu soo noqdo ma aammini kartid, waayo waad soo daahday. Waa inaad rumaysatid inta uusan soo noqon. Bal haddeer isaga rumayso!

**XUKUNKA UGU DAMBEEYA**
Dhacda kale ee dhici doonta mustaqbalka waa xukunka ugu dambeeya. Dhammaan banii-aadmiga waxaa xukumi doona Sayid Ciise, oo u eegaya ficilladooda. Kii kasta ee diiday Ciise Masiix waxaa lagu xukumi doonaa ciqaabta weligeed ah waa cadaabta. Waxaanan ka akhrinaynaa wax ku saabsan taas Muujintii Ciise Masiix oo Yooxanaa loo muujiyey 20:15. *"Oo ku alla kii aan kitaabkii nolosha laga helin isagoo ku qoran, waxaa lagu tuuray baddii dabka ahayd."* Ma jeceshahay inaad cadaabta gashid? Waad geli doontaa, haddii aadan Ciise Masiix rumaysan inuu yahay badbaadiyahaaga.

**CADAABTA**
Cadaabtu waa meel baas oo xun. Waxaa la inoo sheegay in dadka cadaabta tagaa ay ku silcaan wehel la'aan, xanuun, sakaraad, iyo haraad. Cadaabtu waa meel dab iyo madow miiran ah. Kuwa cadaabta taga oo dhammu weligood ma kari doonaan inay halkaas ka baxsadaan oo abadkoodba halkaasay ku waari doonaan. *"Oo Ibiiiskii iyaga khiyaanayn jirayna waraa lagu dhex tuuray baddii dabka iyo baaruuddaa ahayd, halkaas oo ay ku jiraan bahalkii iyo nebigii beenta ahaa, oo iyaga*

*waxaa la cadaabi doonaa habeen iyo maliinba weligood iyo weligoodba."* (Muujintii 20:10)

*"Laakiinse kuwa fulayaasha ah, iyo kuwa aan rumaysan, iyo kuwa karaahiyada ah, iyo gacan-ku-dhiiglayaasha, iyo kuwa sinaysta, iyo saaxiriinta, iyo kuwa sanamyada caabuda, iyo beenlowyada oo dhan waxaa qaybtoodu ku jiri doontaa badda ay dabka iyo baaruuddu ka ololeyaan. Oo taasuna wau dhimashada labaad."* (Muujintii 21:8)

Sidee baad uga hortagi kartid inaanad cadaabta tegin? Markaad dhimatid kuuma suuraggeleyso inaad Sayidka Ciise Masiix ku aqbasho. Markaad soo hor istaagtid xaakinka qiyaamaha wakhtigii waa kam dhammaaday. Maanta waa wakhtiga habboonaaa. Sayidka Ciise Masiix hadda aammin oo waxaad markaas xaqiiqsan doontaa inaad ku baxsanaysid xukunka baas iyo cabsida badan ee xukunta cadaabta. *"... bal eeg, hadda waa maalintii badbaadinta."* (Warqaddii labaad ee Rasuul Bawlos u qoray dadkii Korintos 6:2)

**JANNADA**

In alla intii Ciise Masiix u aqbasha in uu badbaadiye u yahay, waxay aakhira oo dhan joogi doonaan jannada. Jannadu waa meel nasasho, nabad, farxad iyo rayrrayn miiran ah. Jannada waxaynu aad ku raaxaysan doonnaa innagoo weheshanaan kaamil ah Ilaah la yeelan doonna. Jannada ma aha meel banii-aadmiga doonistiisu ay ku baahi beesho, amase damacisu ku haqabbeelo, laakiinse waa meel qoduus iyo nadiif miiran ah.

Waa inaad haddeer laba shay kala doorataa. Waa inaad haddeer cadaabta iyo jannada kala doorataa. Adigu garan maysid goor aad dhimanaysid. Haddii aad dhimato daqiiqad dhow, xaggee baad tegi doontaa? Ma jannadaad geli doontaa, mise cadaabta? Waxaas oo dhammu waxay ku xiran yihiin inaad adigu Ilaah cafis weyddiisatay iyo in kale.

Naarta ha gelin! Haddeer hubso inaad jidkii jannada ku joogtid. Nolashaada u dhiib Sayidka Ciise Masiix.

## Tijaabada Kow-iyo-tobnaad
## Waxyaalaha soo socada

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Ciise Masiix wuxuu u soo noqon doonaa
   B) Dembileyaasha oo dhan.
   T) Dadka tukada oo cibaado fasho oo dhan.
   J) Intii isaga rumaysan oo dhan. -----------
2. Jannadu waa meel
   B) Saxariir miiran ah.
   T) Nabad, farxad iyo rayrrayn miiran ah.
   J) Ay banii-aadmiga doonistiisu iyo damaciisu ku haqabbeelayaan. -----------
3. Dadka maalinta xukunka loo diri doono jannada waxay noqon doonaan kuwa:
   B) Rumaystay Ciise Masiix in uu yahay badbaadiyahooda iyo Sayidkooda.
   T) Aada kiniisadda.
   J) Bixiyo sadaqo badan ama sameeya ajar badan. -----------
4. Waxa dhici doona kan garanaya oo keliyihii waa
   B) Ilaah.
   T) Malaa'igaha.
   J) Dadka. -----------
5. Cadaabtu waa meel
   B) Farxad iyo rayrrayn miiran ah.
   T) Saxariir, kaar iyo dab miiran ah.
   J) Waa meel ii yar laysku ciqimbo. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Kuwa cadmabta gala ilaa intee bay ku jirayaan?

   ______________________________________________

7. Goormaan doortaa meeshii aan aakhiro tegi lahaa?

   ______________________________________________

8. Yaman aamminaa si aan cadaabta uga baxsado?

   ______________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Dadkaasi sameeyey ficillada wanaagsan kulligood waxay aadi doonaan jannada. -----------
10. Si aynu u badbaadno aawadeed waa inaynu Masiixa aqbalno intaanan dhiman. -----------

## Dersiga Laba-iyo-tobnaad

## JID KELIYA

Sida ay xaqiiqo u tahay ii Ilaah keliyuhu jiro, sidaas oo kale waxaa jira jid keliya oo jannada loo maro. Wia maxay jidkaasu?

Ma baryo ban? Maya, baryo ma aba.
Ma ficillo wanaagsan baa? Maya, ficillo wanaagsan ma aha.
Ma lacag la bixiyan? Maya, lacag la bixiyo ma aha.
Ma samaynta wixii kugu wanaagsan ee aad samaysaa baa? Maya, ma aha samaynta wixii wanaangsan.

Haddaba waa maxay jidka jannada lo maraa?

SAYIDKA CIISE MASIIX wuxuu yiri, ANIGU WAXAAN AHAY JIDKA. Ma Isagaa ah jidka keliya? Haa, Isagu waa jidka keliya oo jannada loo maro. Ma jiro mid qura oo madaxda banii-aadanka ka mid ah oo ina tusay jidka qumman oo jannada loo maro. Laakiinse Ciise Masiix oo qura ayaa tilmanaay JIDKA KELIYA oo jannada loo maro. Isagu waa jidka. Haddii aynaan Ciise Masiix raacin, Innagu innaba jannada tegi mayno.

Waxaad goosan kartaa inaad raacdo jidka ku geynaya nolosha weligeed ah iyo jannada, ama waxaad raaci kartaa jidka ku geynaya dhimashada iyo cadaabta weligeed ah.

Ilaah  wuxuu doonayaa inaad dorato jidka taga nolosha weligeed ah. Shayddaanku wuxuu doonayaa inaad dooratid jidka taga dhimashada weligeed ah. Shayddaaikuna kuguma qasbi karo inaad doorato jidka cadaabta taga. Adigu waxaad leedahay ikhtiyaar. Adigu waad dooran kartaa meeshii aad doonayso inaa aakhiro tagtid. Waa inaad maanta doorataa. Haddii aadan Sayidka Ciise Masiix maanta dooran waxaad raaci dootaa jidka cadaabta taga. Haddii aadan haddeer go'aan gaarin, waxaad dooratay dhimashada weligeed ah. Waxaa suurtaggeli karta in aan ilaa berrito lagu la sugin intaad go'aan ku gaarayso. Waxaa suurtaggeli karta inaad dhimato.

*“Waayo wuxuu leeyahay, Wakhti la aqbalay ayaan ku dhegaystay, Oo maalintil badbaadintana ayaan ku caawiyey. Bal eeg, hadda waa wakhtigii ia aqbalay. Bal eeg, hadda, waa maalintii badbaadinta.”*
(Warqaddii labaad ee Rasuul Bawlos u qoray dadkii Korintos 6:2)

Sayidka Ciise Masiix wuxuu iskutallaabta ugu dhintay dembigaaga aawadiis. Wuxuu ku dhintay meeshii aad ka dhiman lahayd, oo wuxuu qaatay ciqaabtaadii. *“Sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii, wuxuuna qaatay murugadeennii, laakiinse waxaynu ku tirinnay mid belaayo ku dhacday, oo Ilaah dilay, oo dhibaataysan. Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna, edbintii nabaaddiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildiilaaciisiina waynu ku bogsannay. Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay, midkeen waliba jidkiisuu u leexday, oo Rabbigu wuxuu isaga dul saaray xumaanteenna oo dhan.”*
(Kitaabkii Ishacyaah 53:4-6)

Aqbal Masiixa kuu dhintay, o waa inaad Ilaah ku tiraahdaa, *“Anigu waxaan ahay dembile, oo waxaan galabsaday cadaab. Waxaan hadda rumaystay in Ciise Masiix ii dhintay oo uu dembi iga dhanfay. Hadda waxaan u aqbalay inuu badbaadiyahaygii yahay, o waxaai isku deyi donaa inaan isaga u noolaado wixii hadda ka dambeeya.”*

ILAAH KELIYA IYO JID KELIYA! Haa, waxaa jira Ilaah keliya oo run ah. Waxyaalaha kale oo ilaahyada lagu sheego oo dhammu waa wada been. Waxaa jira jid keliya oo runta ah, oo jidadka kale o idil waa wada been.

Aammin Ciise Masiix oo hubsana inaad ku taagan tahay ama aadayso jannada. Ciise Masiix wuxuu yiri, *“Kii ii yimaadana ma eryi doono.”* (Injiilka sida Yooxanaa u qaray 6:37)

## Tijaabada Laba-iyo-tobnaad
## Jid keliya

**Xarriijinta dhinaca midigta ku taal waxaad ku qortaa xarafka sheegaya jawaabta saxda ah. Saddexda xaraf mid qura ayaa sax ah, B, T ama J.**

1. Sayidka Ciise Masiix waxaa lo deldelay
   B) Xadgudubyadeenna.
   T) Xadgudubkiisa.
   J) Sabab la'aan. -----------
2. Jid keliya ee jannada lo maraa wa
   B) Baryada Ia tukado.
   T) Camal wanaagsan.
   J) Ciise Masiix. -----------
3. Shayddaaku wuxuu kula doonayaa inaad dooratid
   B) Ciise Masiix inuu yabay Badbaadiyahaaga.
   T) Jidka loo maro dhimashada iyo cadaabta.
   J) Jidka jannada loo maro. -----------
4. Ciise Masiix wuxuu dhulka u yimid
   B) Inuu nebi noqdo oo keliya.
   T) Inuu ciqaabtii dembigaaga dhimasho ku qaado aawadeed.
   J) Inuu sidii shabiid o kale u dhinto. -----------
5. Wakhtiga la goosto in la badbaado waa
   B) Markaad noloshaada dunida dhistid.
   T) Markii aad gabowdo.
   J) Haddeer, markii aad erayga Ilaah maqashid. -----------

**Su'aalahan dhawr oo erayada dersiga ku jira kaga jawaab:**

6. Ilaah jidkee buu rabaa inaynu doranno?

   ____________________________________________

7. Sayidka Ciise Masiix maxaa lo dhaawacay?

   ____________________________________________

8. Yaa rabaa inaad jidka cadaabta dooratid?

   ____________________________________________

**Kuwan "run" iyo "been" mid kaga jawaab:**

9. Waxaa jira Ilaah keliya. -----------

10. Adigu waxaad galabsatay jannada. -----------

## ILAAH KELIYA IYO JID KELIYA

## JAWAABAHA TIJAABADA OO DHAN

**NATIIJO: ______**

Tijaabada laad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ________________________________________________
7. ________________________________________________
8. ________________________________________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 2aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ________________________________________________
7. ________________________________________________
8. ________________________________________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 3aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ________________________________________________
7. ________________________________________________
8. ________________________________________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 4aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ________________________________________________
7. ________________________________________________
8. ________________________________________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 5aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ________________________________________________
7. ________________________________________________
8. ________________________________________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 6aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ________________________________________________
7. ________________________________________________
8. ________________________________________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 7aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ____________________
7. ____________________
8. ____________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 8aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ____________________
7. ____________________
8. ____________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 9aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ____________________
7. ____________________
8. ____________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 10aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ____________________
7. ____________________
8. ____________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 11aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ____________________
7. ____________________
8. ____________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Tijaabada 12aad. 1. ___ 2. ___ 3. ___ 4. ___ 5. ___
6. ____________________
7. ____________________
8. ____________________
9.___ 10.___ **NATIIJO:___**

Hadii aad wax su'aal ah qabtid, halkan ku soo qor, annaguna waannu isku dayaynaa inaannu kaaga jawaabno.

**MAGACAAGA:** ____________________
**CINWAANKAAGA:** ____________________
**SANDUUQA BOOSTADA:** ____________________
**MAGAALADA:** ____________________
**DALKA:** ____________________

**Tijaabada u soo dir:**

**Info/Contact**
**Postbus 54234**
**3008 JE Rotterdam - NL**

**www.info-contact.nl**

Kitaabka
Qoduuska Ah

BIBLE CORRESPONDENCE COURSES

@ All rights reserved

Info/Contact
Postbus 54234
3008 JE  Rotterdam- NL
www.info-contact.nl